

# Waddooyinka tacliinta

Nidaamka waxbarashada Finlandoo la soo koobay

# Barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadka

Carruurta ka yar da'da dugsiga waxaa u suuro gal ah inay ka qaybqaataan **barbaarin-horaadka**. Kaasi waa waxbaris iyo xanaanayn la isku daray.

Waalidku wuxuu ka mas'uul yahay in uu ka warhayo in uu ilmihiisu ka qaybqaato waxbarasho-horaadka ama waxqabad kale oo shardiyada buuxinaya. Waxbarasho-horaadku waa waxbaris lagu kaalmeeyo shardiyada waxbarashada. Ilmuhu wuxuu ka qaybqaadanayaa waxbarasho-horaadka sannadka ka horreeya waajibka waxbarashada.



# Waxbarashada aasaasiga ah

Waajibaadka waxbarashadu wuxuu bilaabmaa guud ahaan sannadka uu ilmuu buuxiyo 7 sano. Ilmuu markaas ayuu bilaabayaa **dugsiga hoose-dhexe**, oo ay ku jiraan fasallada 1-9.

Dugsiga hoose-dhexe fasalladiisa 1-6 waxaa la isku yidhaahdaa dugsiga hoose, fasalladiisa 7-9 waxaa la isku yidhaahdaa dugsiga dhexe. Dugsiga hoose-dhexe kaddib wuxuu qofka dhallinyarta ah dalbanayaa dugsi sare ama machad xirfadeed.

Waajibaadka waxbarashadu wuxuu dhammaadaa marka uu qofka dhallinyarta ah buuxiyo 18 sano ama marka uu diyaariyo dugsiga dhexe ama machadka xirfadda.



# Dugsiga sare

**Dugsiga sare** iyo waxbarashada xirfadda ah waxaa la isku yidhaahdaa waxbarashada darajada labaad. Waxbarashada dugsiga sare waa mid xadaarad guud lagu helo oo anan lagu helin aqoon xirfadeed.

Dugsiga sare wuxuu caadiyen qaataa saddex sano marka uu qofku dhamaystana wuxuu diyaariyaa shahaado dalka dhan laga diyaariyo oo dugsiga sare lagu dhameeyo. Qofka dugsiga sare dhigta wuxuu dalban karaa jaamacad, tacliinta sare ee xirfadda ama machad xirfadeed.



# Waxbarashada xirfadda

**Waxbarashada xirfaddu** waxaay qofka u diyaarisaa xirfad gaar ah, tusaale ahaan dubidda doolshaha ama waxyabaha kale ee la dabo, xirfadle koronto ama kalkaaliso hoose. Waxbarashada aasaasiga ah ama dusgsiga sare ardeyga ka dalbanaya waxbarasho xirfadeed wuxuu sida caadiga ah diyaariyaa shahaadada aasaasiga u ah xirfaddaas uu aqoonteeeda baranayo.

Waxbarashada xirfadda ardeyga dalbaday wuxuu sidoo kale diyaarin karaa shahaado labo nooc ah: markaas wuxuu xirfadda barashadeeda ku dul baranaya waxbarashada dugsiga sare wuxuuna qaadanaya shahaado xirfadeed iyo tu dugsi sareba.

Marka uu ardaygu diyaariyo waxbarashada xirfadda wuxuu dalban karaa jaamacad, tacliinta sare ee xirfadaha ama dugsi sare.



# Dugsiga tacliinta sare ee xirfadaha

**Tacliinta sare ee xirfadaha** iyo jaamacaduhu waxaay isku yihiin nidaamka waxbarashada sare.

Waxbarashada tacliinta sare ee xirfaduhu waa mid waxqabad leh oo ka jawaabaysa baahiyaha nolosha shaqada.

Qofka diyaariyay tacliinta sare ee xirfaduhu wuxuu dalban karaa darajada sare ee tacliinta xirfadaha.

Waxa uu shardigu yahay in uu ugu yaraan labo sano ka soo shaqeeyay shaqada uu bartay markii uu diyaariyay shahaadada tacliinta sare ee xirfadaha.

Sida caadiga ah diyaarinta tacliinta sare ee xirfaduhu waxaay qaadataa 3,5-4,5 sano. Qofka diyaariyaa wuxuu xattaa dalban karaa jaamacad.



# Jaamacad

**Waxbarashada jaamacadda** ujeedadeedu waxa weeyaan cilmibaaris cilmiyeysan ama farshaxan ku salleysan. Waxbarashada jaamacaddu waxay sida caadiga ah ku salleysantahay darajada hoose (sida caadiga ah degreega hoose) iyo darajada sare (sida caadiga ah degreega masterka).

Waxbarashada masterka qofku marka uu dalbanayo waa in uu haystaa degreega hoose. Kaasi wuxuu noqon karaa degreega hoose ee jaamacadda ama shahaadada tacliinta sare ee xirfadaha.

Darajada sare tacliinta sare ee xirfadaha qofka haystaa wuxuu dalban karaa doktoreedka ama laysensiaytka.

